MAINE IMMIGRANTS' RIGHTS COALITION

# Talaalada COVID-19: Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo

## Waa maxay faa'idooyinka helida talaalka COVID-19?

Helida talaalku waxay ka hortagi kartaa qaadista COVID-19. waxaanay ka difaaci kartaa qoyskaaga iyo bulshadaada qaadista xanuunka sidoo kale. Helida talaalku waxay muhiim u tahay joojinta xanuunka COVID-19 iyo in bulshooyinkeenu kusoo noqdaan caadi.

## Waa maxay talaadada COVID-19 ee diyaarka ah imika?

Imika, waxa jira labo talaal oo la ansixiye:

- **Talaalka Pfizer BioNTech COVID-19**
- **Talaalka Moderna COVID-19**

Labadan talaalba aad bay waxtar u leeyihiin waxaanay jiray daraasado iyo cilmi-baaris la sameeyey si loo hubiyo inay badqab u yihiin dadweynaha.

## Yaa Talaalka Qaadanaya?

Shakhsiyaadka 16 sano ka weyn ayaa lagu dalaali karaa talaalka Pfizer BioNTech , shakhsiyaadka 18 sano ka weyn waxa lagu talaali karaa talaalka Modern.

## Goormaan heli karaa talaalka?

Maine waxay isticmaalaysaa nidaamka wajiyada ee talaalka. Imika, waxaanu ku jirnaa wajigii koobaad. Wajigani, daryeelayaasha shaqaalaha caafimaadka, la jawaabayaasha xaaladaha degdega ah, kuwa ku nool xarumaha la kaalmeeyo, iyo dadka da'da ka weyn 70 ayaa la daawaynayaa. Dadka da'doodu tahay 65 ilaa 69 iyo dadka waaweyn ee halista ugu jira xaaladaha caafimaad ayaa la talaali doonaa wajiga xiga. Talaalka dadweynuhu wuxuu diyaar noqon karaa xagaaga 2021

## Sidee loo qaataa talaalka?

Labada talaalba waxa lagugu siinayaa irbad muditaan muruqa ah waxayna u baahan tahay labo irbadood. Talaalka Pfizer BioNTech, irbadaha waxa la kala qaataa labo todobaad. Talaalka Moderna, irbadaha waxa la kala qaataa labo todobaad.

**Miyaad rabtaa inaad waxbadan ka ogaatid talaalka COVID-19?**
**Su'aalahaaga iimayl ugu dir C19vaccine.MECDC@maine.gov**

Macluumaadka lagasoo qaatay Maine CDC: https://www.maine.gov/covid19/vaccines/public-faq

### Maxaan u sheegaa talaal bixiyahayga ka hor intaanan qaadan talaalka?

Waxaad u sheegaysaa talaal bixiyahaaga **xaalado caafimaad oo kasta** ood leedahay.

- leedahay wax alaarji ah
- leh xumad
- leh cilad dhiiga ah ama qaata daawo dhiig
- difaac liita ama leh saameeyn caafimaad oo saameynaysa hab dhiska caafimaadka
- xaamilo ah ama qorsheeysay inaad xaamilo noqotid
- aad naasnuujinaysid
- aad heshay talaal kale COVID-19 ah

## Miyey jiraan wax saameyn ah oo uu leeyahay? Maxaan sameeyaa hadii aan waajaho?

Waxaad waajihi kartaa waxoogaa saameyn ah oo uu leeyahay talaalku. Kani waa falcelin caadiya waanu iska baabi doonaa maalmo kooban gudohood. Saameyntu waxay noqon kartaa astaamaha COVID-19 oo kale (muruq xanuun, madax xanuun, iyo xumad) waana badanaa ka dib irbada labaad, suurtogalnimada in talaalku yeesho saameyn daran aad ayey u yar tahay.

## Miyaan qaadan karaa talaalka hadaan xaamilo ahay ama naasnuujinaayo?

Waa inaad kala doodaa doorashooyinka daryeel bixiyahaaga caafimaad ama shaqaalaha caafimaadka bulshada.

### Marhoreba waan qaaday COVID-19, miyaan wali is talaaliyaa?

Xataa hadii aad mar horey qabtay COVID-19, waxa lagula talinayaa inaad is talaashid. Waxaad heli kartaa talaalka wakhti kasta ka dib markaad kasoo kabatid COVID-19.

**Waxaan leeyahay xaalad caafimaad oo jirta, miyaa ii caadibaa talaalku?** Waa inaad kala doodaa xaaladaha ama walaacyada aad qabtid daryeel bixiyahaaga caafimaad ama shaqaale caafimaad bulsho si uu u go'aamiyo in talaalku kuu badqabo adiga.

## Miyuu talaalku i qaadsiin doonaa COVID-19?

Maya, talaalku kuma qaadsiin doono COVID-19.

**Miyaad rabtaa inaad waxbadan ka ogaatid talaalka COVID-19?**
**Su'aalahaaga iimayl ugu dir C19vaccine.MECDC@maine.gov**

Macluumaadka lagasoo qaatay Maine CDC: https://www.maine.gov/covid19/vaccines/public-faq

MAINE IMMIGRANTS' RIGHTS COALITION

## Muxuu ka kooban yahay talaalku?

Labada talaal **kama koobna** beed, ilaaliyayaal ama wax macmal ah. Waxay ka kooban tahay waxaad liiskiisa ka heli kartaa halkan:

- Talaalka Pfizer BioNTech: https://www.fda.gov/media/144414/download
- Talaalka Moderna: https://www.fda.gov/media/144638/download

## Miyey labada talaalba ka wada iman doonaan isku hal sharkad?

Haa. Irbada koobaad iyo ta labaad ee talaalku **waa** inay soo wada saartaa shirkad (Pfizer ama Moderna). Adigu **kama** qaadan kartid mid kiiba.

## Ka dib markaan helay labada irbadood, miyaan wali u baahanahay inaad xirto maaskarada wajiga oo aan sameeyo kala fogaanshaha bulshada?

Haa,xataa hadii lagu talaalay waa inaad sii wadaa xirashada maaskarada wajiga oo aad iska ilaalisaa isku dhawaanshaha dadka kale. Ma jiro macluumaad ku filan wali Maine CDC si loo joojiyo shuruuda shakhsiyaadka ee raacida baratokoolka badqabka COVID-19.

# Miyaad rabtaa inaad waxbadan ka ogaatid talaalka COVID-19?

# Su'aalahaaga iimayl ugu dir C19vaccine.MECDC@maine.gov

Macluumaadka lagasoo qaatay Maine CDC: https://www.maine.gov/covid19/vaccines/public-faq